

CERVICAL CANCER AWARENESS



Waa maxay Cervical Cancer?

Cancerka ilma galeenka waxaa sababa noocyo ka mid ah caabuqa ama xanuunada ka yimaada HPV Jermiska. Dadka badankooda waxaa ku dhaca HPVga. Dad badan ayaan dareemin wax xanuun ama jiro ah oo ku saabsan caabuqan iyo jermiskan. Hase ahaatee, dadka qaar ka mid ah, wuxuu caabuqani ama jermiskani sababaa ama u keenaa isbedel ku dhaca cervixka (ilma galeenka korkiisa) kaasoo hadii aan lala tacaalin ama aan la dawaynin noqon kara Cancer



Keeday qatar ku tahay in uu ku dhaco Cervical Cancerku?

Cudarkan wuxuu halis u yahay, qof kasta oo leh Cervix, kuwaas oo da'doodu u dhaxayso 25 to 65 jir. Waxaa haboon in dadka da'daan jira ay iska baaraan cudurkan shantii sanaba mar. Hadii aadan awoodin in aad iska baarto cudurkan HPVga shanti sanaba mar, waxaa kuu haboon in at iska baartid Pap test sedexdii sanaba mar. Hadii baaritaankii Pap testiga ama natiijadii ay noqoto in lagugu sheego "abnormal Pab test" mid aan caadi ahay (normal ahayn) amaba uu dactorku u maleeyo in ay qatarta HPV sareeyo oo ay halis kuu tahay, waxay kugula talin doonaan in aad isu baartid si joogto ah.



Waa maxay baaritaanka cervical cancerka?

Baaritaanka Cancerka ilmagaleenka waa marka dhaqaatiirtu ay dhecaan ka soo qaadaan ilmagaleenka korkiisa. Baaritaanka noocan ah ayaa loogu yeeraa Pap smear or Pap test. Dhecaankan ayaa laga baaraa HPV laguna ogaadaa in caabuq amd bacteria uu qofku qabo. Marka qofka laga baarayo ama laga fiirinayo in uu qabo Pab Smearka, dhaqaatiirta ayaa isticmaalaa qalab la gu magacaabo (speculum) kaa soo ay galiniyaan xubinta taranka, si ay u balaariyaan oo ay ugu sahasho baaritaanka.

Baaritaanka noocan ah, ayaa hadaba dadka qaar u keeni kara in ay dareemaan xanuun xaga jirka iyo maskaxdaba ah marka qaar dadka ka mid ahina aysan waxba dareemin. Dadka jirkoodu waa uu kala duwan yahay. Hadii uu qofku wal-wal ama walaac ka qabo baaritaanka ama sida loo baarayo iyo qalabka ay dhaqaatiirtu isticmaalayaan, waxaa ku haboon in ay la hadlaan dhaqaatiirta una sheegaan waxa ay dareemayaan. Marka dadku yiraahdaan, "Women's Annual Exam" waxay ula jeedaan ama ka hadlayaan, in dumaka laga baarayo cervical cancer, lana

marsiyyey baaritaankii sanadlaha ahaa eelagu baarayey caafimaadka ilama galeenka ama xubinta taranka ee dumarka!

Sidee buu qofku u dareemi karaa am u sheegi karaa in uu cervical cancer qabo?

Sida kaliya ee lagu garto ama lagu hubsan karo in uu qofku qabo cudurkan, waa in uu is baaraa oo uu laxariiraa dhaqaatiirta. Calaamadaha lagu garto cudurkan ayaa ayaa kuwo ka imaan kara, jirooyin kala duwan. Hadii qofku uu dareemayo calaamooyin welwel ku abuura, waxaa ugu wanaagsan in uu dhaqtorkiisa ula xariiro sida ugu dhaqsaha badan.

